



Public Health
England



Xogta waalidka deggan London

Tallaalka Qaaxada (TB-da) ee BCG iyo cunugaaga

Gudaha UK, sida dalal kale oo badan, tallaalka BCG (Bacillus Calmette-Guérin) ayaa loo yaboohaa dhallaanka ay suuragalka tahay in ay xiriir la sameeyaan qof qaba qaaxada (TB-da).

Tan waxaa ka mid ah dhallaanka ku nool aag ay ku badan tahay qaaxada (TB-da) ama dhallaanka waalidkood ama awoowayaashood/ayeeyayaashood ka soo jeedaan waddamo ay ku sareyso (TB-da) qaaxada.



 **immunisation**

the safest way to protect your child

Laga soo bilaabo 2016, qaybo badan oo ka mid ah xarumaha dhalmada ee London ayaa dhammaan dhallaanka u yaboohay tallaalka BCG sababtoo ah heerarka qaaxada (TB-da) ayaa ka sarreeyay qaybaha kale ee dalka. Si kastaba ha ahaatee, tirada dadka qaba qaaxada (TB-da) ee London ayaa hoos u dhacayay sannad walba 8-dii sannadood ee la soo dhaafay.

Sidaa darteed, laga billaabo Sibtembar 2020, tallaalka BCG ma heli doonaan dhallaan kasta oo ku dhasha London. Dhallaanka ku nool aag ay ku badan tahay qaaxada (TB-da) ama dhallaanka waalidkood ama awoowayaashood/ ayeeyayaashood ka soo jeedaan waddamo ay ku sareeyso (TB-da) qaaxada waxaa loo sii yaboohi doonaa tallaalka BCG. Tallaalka BCG waxaa lagu bixin doonaa xarumaha caafimaadka bulshada.

Laga billaabo Sibtembar 2020, haddii aad 'Haa' uga jawaabtid mid ka mid ah su'aalaha soo socda, umulisadaada, booqdahaaga caafimaadka amaba GP-gaaga ayaa u gudbin doona dhallaankaaga xarunta bulshada ee tallaalka BCG:

- Cunugaaga, hooyada cunugga, aabaha ama awoowaha/ ayeeyada, ama qof kasta oo kula nool, miyey ka soo jeedaan waddan ay ku sareeyso qaaxada (TB-da)*?
- Adiga iyo cunugaagaba miyaad la noolaan doontaan ama aad la joogi doontaan saaxiibo iyo qoys ku nool mid ka mid ah waddamadan?
- Ma jiraa qof kula nool, ama waqti badan la qaata cunugaaga, oo hadda qaba qaaxo (TB) ama horay u qabay qaaxo (TB)?
- Miyaad ku nooshahay London Borough of Newham?



* www.gov.uk/government/publications/tuberculosis-tb-by-country-rates-per-100000-people